



Maalin qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan maalinta jimcaha

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Nabiga ka wariyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee inuu yiri: "Maalin qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan maalinta jimcaha, iyadaa Adam la abuuray, iyadaana janada la galiyey, iyadaana laga soo saaray, qiyaamuhuna dhicimaayo maalin aan jimce ahayn".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay in maalin qoraxi soo baxdo maalinta jimcuhu ugu khayr badan yahay. Sifooyinkiisa waxaa ka mida: inuu Ilaahay abuuray Nabi Adam-nabadi korkiisa ha ahaatee-, isla jimcahana janada la galiyey, jimcena laga saaray oo dhulka loo soo dajiyey, qiyaamuhuna ma dhacayo maalin aan jimce ahayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3711>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

